

WARQADA XAQIJIINTA: GAADIIDKA & WAQTIYADA JALASKA(GAMBALEELKA)



Si loo xakameeyo hoos u dhaca miisaaniyadda, Dugsiyada dadweynaha Minneapolis waxaa ka go'an in ay qaabeeyaan miisaaniyada iyo kharashyada sanad dugsiyeedka 2019-20. Tani waxay ka dhigan tahay in si xoogan loo eego meelaha laga goyn karo miisaaniyada iyo kharashkeeda. Sababeynta hoos u dhaca miisaaniyada waa mid aad u adag, Lakiin waxa ugu waaweyn waxaa ka mid ah:

- Aan la maalgalin ama si fiican u maal galin dowlada adeegyada waxbarashada Gaarka iyo adeegyada bartayaasha luuqada afka ingriiska.
- U kordhinta mushaarka shaqaalaha iyo faa'iidooyinka
- Hoos u dhaca isdiwaan galinta ardayda
- Heererka adeegyada gaadiidka
- Sicir-bararka

Wakhtiga uu hada dugsiyadu Bilowdaan. Aan waxtarka Weyn sameyneyn:

- 29^{an} waqti oo kala duwan oo ay bilowdaan 68^{eed} Dugsiyo
- 21^{an} Iskuul oo basaska caadiga ah oo bilaawda inta u dhaxeyso 7:30 aroornimo. – 8:05 aroornimo.
- 6 Dugsi oo kaliya ayaa bilowda saacada 9:30 aroornimo kadib.
- Si la isugu dheeli tiro waxaa loo baahan yahay 78 dheeraad ah si loogu badbaado saacadaha deg-dega ee aroortii ah.
- Dheeli tirkaan, waa in dugsiyo badan loo soo dhaweeyaa saacada 9:30 aroornimo.
- **Gaadiidka basaska kala duwan oo waqtiga dheeriga shaqeeya ayaa ah isticmaalka kharashka keydka**
- Basaska gaadiidka oo shaqeeya waqti dheer waxay ka dhigan tahay in loo baahdo shidaal iyo dayactir, iyo darawal oo lacag dheeri ah lasiiyo; marka taa dhacdo waxaa la helayaa darawalo joogto ah oo xiriir wanaagsan la leh ardayda, taas oo dhlinaysa nabad galyada basaska.

Badbaadinta gaadiidka

- **Si loo beeqaamiyo \$2M** waxaa la soo jeediyey isbedelka jalaska (gambaleelka) in la badalo sanad dugsiyeedka FY2018-19; **Ka eego bogga kale liiska isbadalada waqtiyada ee lagu soo dhejiyey.**
- Hadafku waxaa uu ahaa in isbadalku uu noqdo waqtiga gambleelka (jalaska) 1 saac in aan ka badneyn.
- 4 ka mid ah 20 iskuul waxay leeyihiin isbedel ah 70-daqiiqo
- Fikrahada laga soo uruuriyey: Guddiga latalinta waalidiinta degmada, guddiga la talinta waxbarashada Gaarka ah, Guddiga badelka jalaska (gambaleelka) (Waaxda hogaaminta Maamulayaasha)

Miisaaniyadda waqtiyadeeda 2018

Mudadda isbadalada la soo jeediyey waxaa u codeeyn doona Guddiga waxbarashada oo qeyb ka ah nidaamka ansixinta miisaaniyada guud sida ku qeexan jhalkaan.

- **Jan. 25:** Guddiga Waxbarashada qeybtiisa Miisaaniyada ayaa soo bandhigaaya talooyinka ku saabsanis bedelka Gambaleelka.
- **Feb. 13:** Guddiga Waxbarashada ayaa dhageysnaya taloyinka cusbooneysiinta miisaaniyadda FY2018-19.
- **April/May 2018:** Guddiga Waxbarashada waxaa u dib u eegidoonaa wixii ku cusub miisaaniyadda FY2018-19
- **June 2018:** Guddiga waxbarashada ayaa u codeeynaya Miisaaniyadda FY2018-19

Ma Ogtahay?

- 70% ka mid ah Dugsiyada dadweynaha Minneapolis 35,717 ardaydu inay helaan adeega gaadiidka degmada.
- In ka badan 380 oo basas ayaa loo baahan yahay si loogu qaado ardayda.
- Waxaa jira 180 wadooyinka oo ay maraan basaska 3,680 kaas oo ah socodka basaska; basasku waxay u dhaxeeyaan wadooyinka iskuulka iyo guriga, iskaga gooshidaas oo ah qorshe howled.
- Sanadkiiba in ka badan 6 milyan ayuu isaga gooshaa /kaa oo fulinaya howlaha dugsiyada degmada..
- Kharashka gaadiidka dugsiyada sanadkii waa \$494,000.
- Waxaa ku baxa halkii arday adeega gaadiidka baska:
 - \$998 adeega gaadiidka waxbarashada caadiga ah
 - \$4,255 Adeega gaadiidka waxbarashada gaarka ah
 - \$3,310 ardayga guri la'aanta/ama aan meelena daganeyn